

Muuqaalka Xalka:

Intaa ka dib culumadu waxa ay baadi goobeen si hantidii ummada loo badbaadiyo, isla markaana loo dhex dhigo heshiis iyo maslaxad milkiilayaashii shanta ahaa ee SOMGULF, waxa ay qaadeen tallabooyinka soo socdo:

1. Waxa ay culumadu isku dayday in ay heshiisiiyaan isuna soo dhaweeyaan fikradaha kala fog ee xubnaha SOMGULF, si aanay u burburin shirkaddii, isla markaana si siman ugu howlgalaan badbaadinta hantida ummadda oo ay iyagu markii horaba dadka ka qaadeen. Laakiin taa waxa ay noqotay mid aan suuroobi karaynin, sababta oo ah dhammaan xubnaha SOMGULF waxa ay wada qireen in aanay jirin kalsooni ay ku sii wada joogaan, oo ay ku sii wada shaqeeyaan.
2. Waxa ay culumadu waraysatay in la heli karo jihooyin kale oo la wareego maamulka iyo hantida shirkadaha ay sidan oo kale ku dhacdo qaanuun ahaan, amaba dad kale oo mutadawiciin ah, si loo badbaadiyo hantidaa faraha badan ee baaba'bi karta, taas oo iyana suurogal noqon weysay, tusaalana waxaaba inoogu filan in guddigii maamulayay dhismaha GMC labadii sano ee ugu danbeysay, kana mid ah milkiilayaasha guriga ay soo gudbiyeen is casilaad ah in ay faraha kala baxayaan maamulkii guriga dhamaadka December 2014, sida ku cad qoraalka ay guddiga u soo gudbiyeen.
3. Waxa ay isku dayeen culumadu in qeyb ka mid ah xubnihii shirkadda SOMGULF ay ku wareegaan mas'uuliyadda shirkadda iyo hantideeda, isla markaasna badbaadiyaan hantida shirkadda, taas oo ay xubnaha badankooda diideen in ay qaadaan mas'uuliyaddas, marka laga reebo Xasan Jaamac oo isagu u bareeray in haddii arrintaasi laga cararay isagu diyaar u yahay la wareegidda mas'uuliddaas.
4. Waxaa soo yaraaday waddooyinka kale ee loo mari karo badbaadinta hantidaas, waxaana isa soo xiray dhammaan fursadihii loo heli karayay qaadidda amsuuliyadaas.

Go'aanka iyo Xukunka Culumada:

1. Culumadu markii ay diraaseeyeen khilaafka shirkadda SOMGULF dhexyaalla.
2. Markii ay arkeen khatarta ku soo wajahan Hantida ay dadku leeyihiin, ee kaga imanaysa dhinacyo kala duwan.
3. Markii ay xalka ka raadiyeen dhinacyada uu ka suuroobi karayo oo idil, suurto galna ay noqon weysay.
4. Markii ay la tashiyo la sameeyeen xubnaha SOMGULF cidda ugu habboon ee qaadi karaysa mas'uuliyadda & hantida SOMGULF mar haddii ay suuroobi weysay in ay wadajir u shaqeeyaan.

Waxay Culumadu xukumeen sida soo socota:

1. In Hantida & Mas'uuliyadda SOMGULF laga bilaabo marka uu xukunkan soo baxo ay saaran tahay Xasan Jaamac Maxamed oo kamid ah xubnaha SOMGULF, waayo:
 - A. Waxay guddiga Culumadu u arkeen daruuri in uu qaado mas'uuliyaddaas qof ka mid ah xubnaha SOMGULF, kadib markii ay adkaatay in ay wadajir u hayaan.
 - B. Waa qofka kaliya ee SOMGULF gudaheeda u diyaarka ah qaadista masuuliyadda & hantida SOMGULF mid lagu lahaa iyo mid ay lahaydba.
 - C. Waa qofka ay xubnaha kale ee SOMGULF tilmaameen in uu ugu haboon yahay qaadista xilkaas.

Signature
12/12/2014

Signature
12/12/2014

Signature
12-12-14